Magaca kooxda
Degmada Camden ee London
Town Hall
Judd Street
London
WC1H 9JE

camden.gov.uk

**Taariikhda:** [insert date]
**Tixraaceena:** [insert reference]
**Iimaylka:** [insert email]

Cinwaanka
Cinwaanka
Cinwaanka
Cinwaanka
Cinwaanka
Cinwaanka

[NAMES] qaaliga ah

**Waxaan rabnaa inaan maqalno sida aad u aragto inaad ku nooshahay Whittington Estate**

Ka xubin kugu matasha Golaha Guryaha ahaan, waxaan ogahay inaysan jirin wax Golaha Camden uga muhiimsan in dadka deegaanka ah ay ammaan iyo farxad ku dareemaan guryahooda, waddooyinka iyo xaafadaha. Waxaan qof kiro ahaan u degan guryaha golaha soo ahaa sanado badan sidaas darteed waxaan fahamsanahay niyad jabka ay dadka deegaanka ah ay kala kulmi karaan adeegyada guryeynta.

Waxaan rabaa inaan kuu sheego qaar ka mid ah siyaabaha Golaha ay wax ka hagaajin ugu samaynayaan gurigaaga. Waxaana ka mid ah maalgelin ka badan £140 milyan oo lagu horumarinayo badbaadada dabka, soo saarista CCTV-yo cusub, shaqaaleysiinta shaqaale badan oo dayactir samaysa, dib u soo iibsashada lagu qaatay xaquuqda iibsashada ee dadka la kulmayay ciriiri iyo xaqiijinta in kireyste kasta uu booqasho ka helo sarkaalka ka warqabka guryaha.

Laakiin waxaan arrintaan sameyneynaa iyadoo ay jiraan cadaadisyo waaweyn. Koonsilku waxa uu helay £69m in ka yar si loogu maalgeliyo guryaha intii u dhaxaysay 2016 iyo 2020 sababo la xiriiray go'aamada dawlada. Taasi waxay ka dhiganayd in cadaadis weyn uu naga saarmay adeegyada sida dayactirka iyo liiska sugitaanka guryaha dawladda hoose.

Waxaan go'aansanay in taasi aysan naga hor istaagin raadinta xalalka si aan gacan uga geysanno horumarinta meesha aad ku nooshahay. Taasi waa sababta aan estate-yadeena ugu waaweyn ugu qabanayno Estate Action Days (Maalmaha Waxqabadka Estate-ka) isla markaana aan wadahadalo ula yeelanayno kiraystayaasha ku nool guryaheena yaryar si aan u ogaano waxa aad u malaynaysaan inaan u baahanahay inaan horumarin ku samayno iyo si aan u bixino talo iyo taageero wax ku ool ah. Oo estate-kiina ayaa ah meesha xigta ee aan imaanayno.

Wadahadalada - waxaan ku soo garaaci doonaa albaabkaaga

Waxaan ognahay in dhammaan waxyaabaha ay la kulmaan dadka deegaan ah aysan isku mid ahayn, sidaas darteed waxaan rabnaa inaan la hadalno tirada ugu badan ee kireystayaasha ah ee suurtogalka ah. Waxaan garaaci doonaa albaabada guryaha kawnsilka ee ku yaala estate-yada aan booqano, ilaa **Maalinta Waxqabadka Estate-ka**.

Kooxdeena waxay mar walba wadan doonaan baajka aqoonsiga ee Golaha Camden, wada hadalka aanu kula yeelanayna wuxuu ka dhici doonaa albaabka gurigaaga - Marna kuma waydiisan doono inaanu gudaha u soo galno gurigaaga. Waxaan rajaynaynaa inaad wada hadalka aan ku yaalan doono aad u aragto mid faa'iido leh oo aadna aakhirkii dareento in lagu caawiyay.

Maalinta Waxqabadka Estate-kaaga

Waxaan Maalinta Waxqabadka Estate-ka ku qaban doonaa Estate-kaaga marka ay taariikhu tahay **Khamiis 29 Febraayo** laga bilaabo **15:00 ilaa 19:00 ee Garden Room, Retcar Place** oo kooxaheena golaha deegaanka ayaa diyaar u ahaan doona inay gacan ka geystaan:

- Dayactirka: Kooxdeena dayactirka ayaa diyaar u ah inay sameeyaan qaar ka mid ah dayactirada yaryar ee guryaha, waxay ballan u qabanayaan shaqooyinka waaweyn waxayna bixiyaan talo ku saabsan sida loo sameeyo dayactirada DIY ee fudud.

- Guriyeynta: Sarkaalka guryeynta ee xaafaddaada ayaa diyaar u ah inuu kula hadlo haddii aad wax su'aalo ah ka qabto deganaanshaha guriga kirada ah.

- Qiimaha nolosha: Kooxdeena badqabka bulshada waxay awoodi doonaan inay ku siiyaan taageero iyo talo haddii aad ka welwelsan tahay lacag, gunno ama deyn.

- Badbaadada: Haddii aad wax walaac ah ka qabto badbaadada xaafadaada ama aagga deegaankaaga, kooxdeena badbaadada bulshada ayaa diyaar u ah inay kula hadlaan.

Waxaan rabnaa inaan kula shaqeyno si aan horumar u sameyno

Ma awoodi doonno inaan xallino dhammaan dhibaatooyinka la soo gudbiyo inta lagu guda jiro booqashooyinkeena sababo la xiriira maalgelinta oo xaddidan, laakiin waxaan sameyn doonnaa wax kasta oo aan awoodno si aan u hormarino guryaha, inkastoo ay dawladdu dhimayso maalgelinta. Waxaa naga go'an inaan idin la shaqeyno adiga, Ururka Kiraystayaasha iyo Dadka Degan Guryaha Kawsilka iyo hawlwadayaasha deegaanka si aan uga jawaab celino arrimaha lagu soo hadal qaaday wada hadalada lala yeelanyo kiraystayaasha iyo inaan ka wada shaqeyno sidii xal loogu heli lahaa arrimahaas.

Waxaan rajeyneynaa inaan dhowaan ku aragno oo aan wada shaqeyno.

Daacad kuu ah,

Cllr Meric Apak
Xubinta Golaha Better Homes

**Ma u baahan tahay warqadan oo ku qoran luuqad kale?**

Waxaad warqadan oo ku qoran luuqada aad doorbidayso ka heli kartaa **camden.gov.org.uk/estate-action-days** ama la xiriir 020 7974 3295 si aad u codsato nuqul daabacan oo la turjumay.

আপনি এই চিঠিটি অন্য ভাষাতে পেতে চান?

আপনি নিজের পছন্দের ভাষাতে এই চিঠি **camden.gov.org.uk/estate-action-days-**এ পাবেন বা অনুবাদ করা প্রিন্টের একটি কপির অনুরোধ করতে **020 7974 3295-**এ যোগাযোগ করুন।

Ma u baahan tahay warqadan oo ku qoran luuqad kale?

Waxaad warqadan oo ku qoran luuqada aad doorbidayso ka heli kartaa **camden.gov.org.uk/estate-action-days** ama la xiriir **020 7974 3295** si aad u codso nuqul daabacan oo la urjumay.

Avez-vous besoin de cette lettre dans une autre langue?

Vous pouvez trouver cette lettre dans la langue de votre choix à l'adresse **camden.gov.org.uk/estate-action-days** ou contacter 020 7974 3295 pour demander une copie imprimée traduite